Photocopy


# FAAFINTA RASMIGA

# الجريدة الرسمية

## DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA

## لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 4-aad Garoowe, 18, September, 2003 **Lam. 1 R9**

**FAAFINTA BIL WALBA KA SOO BAXDA** جريدة الشهرية

*Qaybta faafinta rasmiga ah ee* ***Madaxtooyada*** *Dawlad Goboleedka Puntland*


Qiimaha waa Sh.So. 10,000 Lambar walba . **Rukunka** Sannadkii waa Sh.So. – 170,000 dalka gudiniisa, dibadana waa Sh.So. 500,000 **Rukunka** La weydiisto wakhtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1-da Janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3,000 **Rukunka** iyo qoritaanka waxaa la weydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha Berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

# TUSMADA


**Qaybta Kowaad**
*Sharci*

**Qaybta Labaad**
**Xeer**
*W/M*

**Qaybta Saddexaad**
*Talooyin, Isgaarsiin, Ogeysiis IWM*
*Waxba Ma leh*


*Sharci Lam. 6 ee 18/09/2003, kuna saabsan Barnaamijka Dawladda iyo Ansixinta Barlamaanka ee jarid 10% ee lagu dheelitirayo isdhinka Miisaaniyadda, taasoo ku-Meel-Gaar ah.*

DAWLAD G. PUNTLAND
EE SOOMAA
Xafiiska madaxwyenha

PUNTLAND STATE
OF SOMALIA
office of the president

---

**SHARCI LR.7-EE** **18-09-2003**

Kuna Saabsan Shaciga Barnaamijka Dawlada Goboleedka Puntalnd Ee July 2001-April -2004 -

**MADAXWAYNUHU**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAAY: | Dastuurka DGPL EE Soomaaliya |
| MARKUU GARWASADAY: | Muhiimada uu leeyahay Sharciga Barnaamijka DGPL EE July 2001-April –2004 – |
| MARUU ARKAY = | Ansixinta Sharci lr .7- Ee ah Sharciga Barnaamijk.Dawl Ansixin Lr.Ee 15-7-2003 |
| MARKUU DHEGAYSTAY | Rayiga golaha xukuumada |

**WUXUU SOO SAARAY**

SHARCIGA SOO SOCD:-

**QODOBKA 1-AAD**

Waxaa Goluhu Ansixiyey Sharciga Barnaamijka DGPL Ee July-2001-April –2004 .

**QODOBKA 2-AAD**

Nuqulada asalka ah Waxaa lagu kala kaydiinayaa xafiisk Madaxwaynaha kan Garyaqaanka Guud iyo Xafiiska xoghayaha golaha wakiilada

**QODOBKA 3-AAD**

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka madaxwaynuhu saxixo,faafinta rasmiga ahana lagu faafiyo,kasa ka mad noqonaya shuruucada P/Land, Qofaksatana Waxaa ku waajib ah inuu dhowro kuna dhaqmo.

**Maxamed cabdi xaashi**
**Madaxwayne ku xigeen ka**
**Ahna sii hayaha xilka madaxwaynaha**

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

NAFIISKA MADAXWEYNAHA

PUNTLAND STATE OF
SOMALIA

OFFICE OF THE PRESIDENT

Garoowe,6da July-2003.

# BARNAAMIJKA DAWLAD GOBOLEEDKA PUNT LAND EE JULY 2001- APRIL 2004

# Barnaamijka Dawladda Puntland ee 2003 – 2005

## 1. Arrimaha Caalamiga ah.

Dawladda Puntland waxay xushmaynaysaa kuna shaqaynaysaa mabaad'ida iyo qawaaniinta Caalamiga ah, waxayna dalkeeda ka hir galanaysaa wixii heshiisyo iyo xeerar caalami ah ee ay Dawladadihii hore ee Soomaaliya, si sharciga iyo danaha dadwaynaha Puntland waafaqsan u galeen una saxiixeen.

Dawladda Puntland waxay ogoshahay, ilaalinaysaa kuna dhaqmaysaa axdiga Qaramada Midoobay (UN), baaqa caalamiga ah ee xuquuqda bini-aadamka. Sidoo kale, waxay Dawladda Puntland isku waajibaynaysaa una hogaansantahay Axdi Goboleedyadda Jaamacada Carabta, Ururka Midowga Afrika (AU), Urur Goboleedka Horumarinta Geeska Afrika (IGAD) iyo Ururka Mu-tamarka Islaamka (OIC).

Dawladda Puntland waxay aaminsantahay in khilaafyada iyo murannada ka jira goobo badan ee aduunka ka mid ah lagu xaliyo dariiq nabadeed iyo wada hadal dhex mara dhinacyad ay khusayso. Dawladda Puntland waxay si xoog leh u danaynaysaa in ay xiriir wada shaqayn la yeelato dawladdaha caalamka, guud ahaan, gaar ahaanna kuwa dariska ah ee ay danaha darisnimo iyo walaalnimo ka dhexeyso.
Dawladdu waxay xirir wanaagsan la yeelaneysaa deeqbixiyayaasha iyo heyadaha calamiga ee dalka Puntland ka hawl gala, si kor loogu qaado loona dhirigeliyo barnamijyada horumarineed iyo arrimaha beni'aadnimo ee dadka reer Puntland u baahanyahay.

Dawladdu waxay kala shaqeyneysa dawladaha Caalamka iyo qaramada Midowbayba sidii loo adkeyn laha nabadda adduunka iyo sidii looga hortegi lahaa loolana dagaallamilaaha argagixisada caalamiga ah.

## 2. Arrimaha Siyasadda iyo Nabadgelyada.

Burburkii dawladii Soomaaliyeed waxaa laga dhaxlay jaah wareer iyo kala daad sanaan bulshada ka saameeyeen dhinac walba. Dagaaladii sokeeye ee dalka Soomaaliya ku baahay waxay sababeen dhimasho boqolaal kun oo dad ah, barakac malaayiin dad ah oo dalka gudihiisa iyo dibadiisaba ku kala firxaday, burbur dhaqaale iyo dhaqan oo saameyn baaxadweyn ku yeeshay bulshada. Arrimahaas oo dhami waxay keeneen in hubkii uu si xad dhaaf ah oo aan taariikhda Somalia horay u soo marin gacanta ugu galay bulshada inteedii badnayd, siiba dhalinyarada, kuwaas oo maanta ka dhigtay qalab xoogsi.

Inkasta oo ay xasilooni la'aantu ay Somalia oo dhan saamaysay, haddana Puntland marka la barbar dhigo qaybaha kale ee dalka guud ahaan way ka amni wanaagsanayd waxaana markasta Goboladda qaarkood ka dhisnaa maamulo. Taasoo dabadeed u horseeday in la dhiso Dawladda Puntland oo ka kobanayd 5 Gobol iyo Degmo 1998 oo ay u dhanyihin qaabdhismeedkeedi iyo qawaaninteedi dawladnimo.

Saddexdii sano ee u horeysay (1998-2001) Dawladda Puntland waxay si buuxda u sugtay nabadgelyada, waxayna dhidibada u aastay qaybihii maamulka (institutions) iyo baahinta xukunka. Taasi waxay keentay horumar dhaqaale oo ka taaba galay dalka, siiba dhinaca lahaanshaha gaar ahaaneed (private sector), iyadoo ay Puntland soo jidatay maalgelin lixaad leh.

Jawigan nabad galyo ee ka jira Puntand wuxuu kaloo horseeday in ay ku soo qulqulaan dad badan oo ka soo bara kacay qaybaha kale ee Somalia oo dagaalada sokeeye iyo xasilooni darradu naafeysay, kuwaasoo culays nabadgelyo xumo, dhaqaale iyo caafimad darro ku keenay deegaamada ay saldhigeen.

Markii ay dhamatay saddexdii sano ee hore waxaa nasiib darro ah in Puntland ay soo foodsaartay khalkhal siyasadeed oo sababay nabadgelyo xumo, xasilooni darro, burbur maamul, dhaqaale xumo iyo dagaal sokeeye, taas oo socotay muddo dhan qiyaastii hal sano iyo sagaal bilood. Muddaas labada sano ku dhow ee khilaafku socday waxaa baaqday fullintii Barnamijkii Dawladda oo ahaa in la meel mariyo aftidii Dastuurka, tirakoobkii Dadka, furitankii Axsaabta Siyasadda iyo Qabashadii Dorashooyinka taas oo ahayd hirgelinta mabadi'da Demoqaradiyada.

Hase yeeshee, Eebe mahadiis iyo nasiib wanaag, dadka reer Puntland bisaylkooda siyaadseed awgeed waxay ku guleysteen inay soo afjareen khilaafaadkaas oo ay wada hadal ku dhameyeen, iyadoo la mideyey mar labaad maamulkii Dawladda Puntland.

Waxaa, haddaba, maanta Dawladda Puntland horyaal mareeynta arrimihii dhaqaale xumo ee ka dhashay khilaafaadkaas siyasadeed oo kharash badan lagu galay iyo dawladii oo ballaratay heshiiskii ka dib iyo ciidamada faraha badan oo dhaqaaluhu uusan xamili karin.

Sidoo kale waxaa Dawladda Puntland horyaal maanta sidii ay u hirgelin lahayd Barnamijka Demoqaradiyenta ee hore u baaqday, tasoo ay ugu horeeyso in Dasturka lagu sameeyo dib u egis (review) si loo waafajiyo wayaha cusub ee siyasadeed iyo dib u heshisinta Puntland.

Dawladdu waxay mudada Barnamijkan mudnaanta koowaad siinaysaa, xoojinta arrimaha nabad gelyada, iyadoo kor loo qaadayo tayada Ciidamada Police-ka iyo Darawiishta, xagga dib u habeynta tiradooda, tababarada, iyo qalabeyntooda. Si haddaba loogu guuleysto barnaamijkan, waxay Dawladdu u aragtaa nidaminta ciidanka in uu saldhig iyo tiir dhexaad u yahay dhammaan qeybaha kale ee barnaamijka Dawladda fulintiisa, sidaas darteed waxaa lagama maarmaan ah in lagu dhamaystiro muddo kooban oo aan ka badnayn 3 bilood dib u nidaamint ciidanka.

### 3. Garsoorka

Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo cadaalad iyo garsoor buuxa sidaas darteed dawladu waxay habaynaysaa maxkamadaha, jeelasha iyo ciidanka asluubta, taas oo loola jeedo in lahelo jawi nabadeed oo suurta geliya in sharciga iyo kala dambayntu gacanta sare yeeshaan iyo in la abuuro qaab kalsooni loogu qabi karo hayadaha garsoorka, sidaas darteed waxaa Dawladdu ballanqaadeysa:

- In aan lagu xadgudbin xuquuqda uu qofku u leeyahay nabadgelyada naftiisa, hantidiisa iyo hoygiisa.
- In la sugo xuquuqda uu qofku u leeyahay inuu helo garsoor cadaalad ku dhisan (fair trial).

- In la ilaaliyo xuquuqda maxaaabiista iyo dhaqan celintoodaba.
- In la abuuro jawi niyadsami ee lagu qabo hay'adaha garsoorka.
- Samaynta xabsiyo cusub iyo hagaajinta kuwii hore.
- In saraakisha Garsoorka iyo kuwa xabsiyada la tababaro.

4. Habka baahinta maamulka

Dawladu waxay u aragtaa in baahinta xukunka iyo awooda dowladnimo ay xubin muhiim ah ka yihiin xasilinta nabadgalyada iyo hurumarka bulshada. Sidaas daraadeed, iyadoo ka amba qaadaysa Dasturka waxay Dawladdu ballanqadaysa inay baahiso xukunka ayna ugu horeyso dhismaha Golayasha Degamada. Waxay kaloo ballanqadeysa inay dedejiso demoqaradiyen taam ah, sidaa darteed waxaa u qorshaysan dawladda:

- Wacyi galinta dadawaeynaha Puntland si loogu diyaariyo in ay is maamulaan
- Qabanqaabada shirar heer tuulo iyo heer degmo oo lagu xulayo xubnaha golayaasha deegaanka
- Fulinta shuruucda golayaasha degaamada iyo qaabdhismeedka dawladaha hoose
- Hagaajinta billicsamida magaalooyinka waaweyn iyadoo loo sameynayo naqshadeyn (town planning).
- Ka bilaabida canshuuraha degmooyinka aysan weli ka hirgelin
- Dawladu waxay si xoog leh ugu hawl geleysaa sidii qaabka degidda magaaloyinka iyo habka dhul bixinta loo hagajin lahaa.

Dawladdu waxay magacabeysaa Guddi Sare (Commission) oo darasad ku sameeya goortii iyo sidii loo hirgelin lahaa demoqaradiyenta nidaamka Dawliga ah ee Puntland oo dhan.

5. Miinasaarka iyo Dhaqan Celinta

Dagaaladdii sokeeye ee Somalia ka dhacay waxay sababeen in gobolo ka mid ah Puntland la galiyay miinooyin xad dhaaf ah oo halis ku ah nolosha dadka iyo duunyadaba, sidaas daraadeed dawladdu waxay u howl-galaysaa sidii dhulka looga sifayn lahaa minooyinkaas, oo hadda howsheeda wax ka bilaabanyihin.

Waxay kaloo si adag ugu hawlgeleysa, iyadoo la kaashaneysa Heyadaha Calamiga ah, sidii milishiyoyinka Puntland loo jiheyn lahaa iyadoo loo aburayo xirfado shaqo iyo ilo cusub oo nololeed.

6. Dib u heshiisiinta Somalia.

Dawladda Puntland waxay aad uga walaacsan thay fawdada dawlad la'aantu keentay oo dalka ka aloosan guud ahaan iyo colaada siyaasadeed ee beelaha qaarkood dhextaal iyo kalsooni la'aanta xujada iyo lugo jiidka ku noqotay dib-u-heshiisiinta qaranka Somalida. Dawladda Puntland waxay gacan ka geysaneysaa arrimaha lagu maareeynayo xal ka gaarka khilaafka Somaliada dhexyaal, si loo helo dhisme Dawlad Dhexe oo Federal ah.

## 7. Barnaamijka dhaqaalaha ee Puntland.

Dalka Puntland waxaa Ebbe ku manaystay khayraad dabiici ah oo dhul iyo bad ballaranba leh iyo biyo durdura ah iyo macaadin, wax soo saarka ugu waa weynna waxaa laga helaa Xoolaha Nool, Kaluunka iyo Beeraha (Xijiga).

Wax soo saarka xoolaha nool iyo kaluumaysigu kuma koobna oo kaliya daboolida nolol maalmeedka dadkeena u badan reer guuraaga iyo kaluumaysatada, waxaase ku dhisan baayac-mushtarigeena gaar ahaan wax dhoofinta oo ay lacagaha qalaad inaka soo galaan. Waxaa kale oo soo raaca, kuwaas, dhoofinta hargaha iyo faleenka, oo dhamaantood daboola baahideenna wax soo iibsasho ee cuntada kale iyo alaabooyinka muhimka u ah dalkeenna.

Siyasadda dhaqaale ee Dawladda Puntland waxaa saldhig u ah dhiirigelinta ganacsiga xorta ah (free enterprise) iyo lahaanshaha gaar ahaaneed. Si loo helo hanti urursan (pool of capital), waxaa dawladdu dhirigelineysaa abuuritaanka shirkado waaweeyn oo ka tartamikara gudaha iyo dibeddaba.

Dawlada Puntland waxay soo dhawaynaysaa, siinaysaana damaanad sharci ah maalgashiyayaasha shisheeyaha ah, si lo horumariyo loona nafacsado khayraadka dabiiciga ah ee Puntland (develop and exploit the natural resources)

### 7.1. Xolaha nool.

Xoolaha nool ee Puntland waa tiirka koowaad iyo lafdhabarta dhaqaalaha, sidaa darteed dawladda Puntland waxay si dhakhso leh u qaadaysaa talaabooyin lagu horumarinayo xoolaha nool ee Puntland, sidoo kale waxay ku dadaalaysaa in la ilaaliyo tayada xoolaha nool iyo badeecooyinka kale ee aynu dibada u iib gayno:

1. Dawladu waxa ay horumarinaysaa caafimaadka xoolaha nool si xooleheena u helaan aqoonsi caafimaad oo caalami ah, waxayna ku guulaysatey mashruuca caafimaadka xoolaha ee PACE oo bilowdey 2001 waxay kaloo ku guulaysatay mashruuca hagaajinta warqadaha caafimaadka xoolaha nool ee debeda loo dhoofsho iyo kawaanada hilibka.
2. Dawladu waxay ku guulaysatey ilalinta degaanka sida joojinta dhoofinta Dhuxusha, jarida Cowska, hadana waxay joojinaysaa dhulka ay dadku xirmeystaan si loo hagaajiyo Degaanka ay xooluhu ku dhaqmaan.
3. Dawladu waxay mamnuucday soo dejinta iyo ka ganacsiga waxyaabaha deegaanka iyo xoolaha wax yeelada u leh sida bacaha iwm.
4. Dawladu waxa ay samaynaysaa barnaamijyo dib loogu habaynayo ganacsiga iyo suuq gaynta xoolaha nool oo ay hada haystaan dhibaatooyin khasaaro leh, kuwaas oo ay kamid yihiin dhamaad la'aanta xaga qiimaha iibka dibada.
5. Dawladu waxa ku guulaysatey joojinta dhoofka ugaarta hadana waxay wacyi gelin ku samaynaysaa dadka si ugaarta loo badbaadsho.

### 7.2 Kallumeysiga

Kalluunka iyo khayraadka badda waxaa weeye tiirka labaad ee dhaqaalaha Puntland, sidaa darteed dawladu waxay ay horumarinaysaa, balaarinaysaana wax soosaarka [illegible] talaabooyinkan:

1. Dawladu waxa ay xooga saaraysaa in ay taageero farsamo iyo qalab u fidiso kalluumaysatada iyadoo la kaashanaysa hayadaha Caalamiga ah dhiiri gelinaysana shirkadaha kaluumaysiga.
2. Dawladu waxa ay samaynaysaa barnaamij horumarineed ee kheyraadka badda, sidii suuq caalami ah loogu heli lahaa wax soo saarka kalluumaysatada.
3. Dawladu waxa ay dhiiri galinaysaa heshiisyo kallumaysi oo ay muwaadiniinta Puntland si sharciyaysan u la gali karaan shirkadaha kaluumaysiga ee Caalamiga ah, kuwaasoo dawladu ay ka rabto in ay ka sameeyaan xeebaha Puntland warshado ka shaqeeya habaynta kalluunka oo her calami ah (international standard of processing) kana gadato kallumaysatada wax soo saarkooda.
4. Dawladu intii karaankeeda ah waxay ka hor tegaysaa tuuga ku kallumeysiga sohdimaha badeheenna (Illegal fishing in Puntland's Economic Zone).
5. Dawladu waxay dejinaysaa shuruuc iyo xeerar kaluumaysi ee lagu nadaminayo ka faideysiga kheyraadka badda.

7.3 Beeraha.

Beeraha ka jira degaamada Puntland waxay ku salaysanyihiin beero yaryar oo qoysasku maceeshadooda ka raadsadaan sidaa daraadeed dawladu waxay ku dedaalaysaa sidii loo taakulayn lahaa beeralayda iyadoo la kaashanaysa hayadaha. Loona abuuri lahaa beero waaweyn.

7.4. Faleenka.

Faleenka oo ah sheyga saddexaad ee badeecadaha Puntland dibedda u dhoofiso, waxaa dalka ka soo gala lacag adag oo xoog leh. Waxaa faleenka ka shaqaysta dad aad ufara badan oo sabool ah, waxaana jira dhibatoyin hortaagan horumarintiisa ayna ka midyihiin, dhulka uu ka baxo oo ah buura ley oo misana aan laheyn wadooyin gaadidku maro iyo biyo midna. Dawladdu waxay ku dadali doonta iney daraasad ku sameyso sidii dhibatooyinkaas looga gudbi laha, dabdeedna ay ula kashan lahayd deeqbixiyayasha iyo heydaha Caalamiga sidi wax looga qaban laha. Waxay kaloo dawladdu ku dadaali doonta sidi loo hagajin laha suuq geynta faleenka (Meydiga iyo Fooxa).

7.5. Timirta.

Timirtu waxay ka mid tahay wax soo saarka Puntland, waxii ka horeeyey lixdanaadkii waxay ahayd dalagyada ugu muhimsan gobolkii la oranjiray Mejertiniya oo dibedda xataa loo dhofin jirey, hase yeshee intii dawladda Somalia dhalatay wax ahmiyad ah lama siin horumarinteeda. Berihii timirta ee degamdaas Bariga foog waxaa waxyello gaarsiiyay duufanti 1972, dabadeedna inkastoo ay beerihi ay weli jiran cidina gacan kuma siin beraleydaas sidii ay wax soo saarkoda u soo garsin lahayeen daka intiisa kale. Dhibatada ugu weyn oo heysatana beeraleydaas waa xagga la'anta wadooyinka gadidka (transport), iyadoo aysan jirin wadooyin loo maro gobaha ay Berahaas badankoodu ku yaalin. Dawlada Puntland waxey ahmiyad weyn hadda siineysa horumarinta iyo ballarinta wax soo saarka timirta, waxayna ku guulaysatey hirgelinta mashruuca fidinta timirta oo hada ka socda demoyinka bari qaarkood. Mashruucaas waxaa maalgeliyey EU/EC iyo hayadda CEFA ee dawlada Talyaniga..

7.6. Warshadaha.

1. Dawladda Puntland waxay dhiiri galinaysaa ahmiyad weyn siinaysaa abuuritaanka warshadaha yar yar iyadoo hada ay jiraan wershedaha hargaha, caanaha, kalluunka, biyaha iyo kuwo kale
2. Dawladu waxa ay si dhakhso leh dayactir ugu raadinaysaa wershedihii Dawladu hore u lahayd ee fadhiyey mudadii burburka iyadoo la kaashanaysa dad maal geliyayaal ah.

.

3. Dawladu waxa ay ku boorinaysaa kuna dhiiri galinaysaa gancsatada Puntland abuuritaanka warshado yaryar oo wax ka tara kor u qaadida dhaqaalaha iyo aqoon xirfadeedka dhalinyarada.
4. Dawladu waxay fiiro gaar ah siinaysaa ka khafiifinta tariifo-canshuureedka qalabka wax soo saarka iyo horumarinta si loo dhiiri geliyo ganacsatada ku hawlan mashaaric horumarin dhaqaale.

7.7. Macdanta.

Inkasta oo aan baaritaan buuxa lagu samayn macdanta Puntland hadana waxaa jira in raadad badan oo macdanaha qaaliga ah lagu arkay dhulka Puntland sidaa daraadeed:

1. Dawladu waxay ka shaqaynaysaa inay heshiis lagasho shirkadaha kambaniyaasha Caalamiga ah ee macdanta baara.
2. Dawladu waxay si dhakhso ah ula xiriiraysaa shirkadihi baaritaanka batroolka ka wadi jiray gobolada Puntland si dib loogu bilaabo baaritaano cusub iyo soo saaridda shidaalka.
3. Dawladu waxay si dhakhso ah u soo saaraysaa, xeerar ku wajahan macdanta iyo khayraatka kale si loo horumariyo ka faa'iidaysigooda iyo ilaalinteeda.

8. Maaliyadda iyo Ganacsiga.

Maliyadda Dawladdu waxay ka kooban tahay tan dawladda Dhexe ee Puntland iyo kuwa Dawladaha Hose kala leh misaniyado gaar ah. Mudadii khilaafka Puntland socoday waxaa dhibaata weyni soo gartay sameynta misaniyad, ama ku socodka qorshaha misaniyadda dawladda marka la dejiyay, taaso durufaha jira awgood ay adkaateyn in kharashyada lagu ekeyo jaangooyoyinki hore loo qiyasay. Hase yeshee, waxay hadda dawladdu ku tallabsandoonta siyaasad ah in lagu socdo misaniyadda la qorsheyo.

Dawladu waxay si dhakhso ah u diyaarinaysaa ku noqosho miisaaniyadeed oo waafaqsan xaladda maamul iyo sisyaasadeed ee amanta dalka ka jirta waxayna isu dheeli tiri doontaa kharajka iyo dakhliga soo gala

Dawladu waxay habaynaysaa canshuuraha, iyadoo la ballarindoono ilaha dakhliga siiba Cashuraha Berriga iyo macaashmacaashka, waxayna dib u eegid ku samaynaysaa tariifooyinka wax lagaga cashuro wax soo dejinta.

Dawladdu waxay xil iska saareysaa ilaalinta sicirbararka iyo sicir dhaca ka yimaada suuqa lacagaha (inflation and deflation). Waxayna ku dadaleysa sidi kor loogu qaadilaha waxqabadka Bankiga dhexe oo awood ku yeesha ganacsiga ku hawlan lagaha qalad iyo shillinka ishaafsigooda.

Waxay kalo dawladuu ku dadali doonta si dalka looga hawgelin laha Banki Ganacsi oo xiirirka maliyadeed iyo ganacsi ee adunka u furan u hawlgala (introduction of documentary credit system).

Dawladdu waxay xojineysa adegga iyo waxqabadka Rugta Ganacsiga si xirir ay ula yeelato ganacsatada addunka iyo Rugaha Ganacsi ee Dawladaha aynu isdhafsi ganacsi la leenahay.

9. Qorsheynta

Qorshaha waxa loogu baahanyahay in daraasad lagu sameeyo lana qiimeeyo barnaamijka hurumarineed ee dalka.
Dawladdu, waxay darasad ku sameyneysa mashaaricda horumarineed ee dalka looga baahnyahay, waxayna isku taxalujineysa iney maal gelin u hesho sidii loo fulin laha barnamijyadaas iyadoo u kla horumarineysa siday u kala mudan yihiin baahida loo qabo.

10. Kabayaasha dhaqaale iyo Bulsho.

Kaabayaasha dhaqaalaha iyo Bulsho ee Puntland waxaa ka mid ah; Dekedaha, Garoomada Dayaradaha, Wadooyinka, Xurumaha Korontada, Isgaarsiinta, Isbataalada Dugsiyada Waxbarahsada iwm. Kaabayaashaas dhaqaale iyo bulsho ee Puntland waxaa soo gaaray dhibaatooyin burbur, dayactir la'aan iyo dhamaystirid la'aan dhismahoodii, sida Garoonka dayaradaha ee Galkacayo, iyo dekada Bosaso, Garoomada Bosaso iyo Garowe, Isbatallada Bosaso iyo Garowe oo lagu dhisay deeq ay bixisay Dawladda Talyanigu, hase yeshee damaystirkoodi joogsaday markii Dawladii Somalia burburtay 1991, welina ay qabya yihiin.

1. Dawladu waxay dayactir iyo dhamaystirid ku sameyndoonta Dekedda Bosaaso iyadoo lakaashanaysa deebixiyayasha iyo hayadaha caalamiga ah, waxey u hawl geleysaa samaynta marsooyin yaryar.
2. Dawladu waxay dayactir iyo balaarinba ku samaysay ayraboorka weyn ee Bosaso hadana waxaay bilaabidoonta dayactirka kan Galkacyo, waxayna hada wadaa dhismaha garoonka caalamiga ah ee Garowe iyadoo lakaashaneysa dadweynaha, waxaana u qorshaysan wax ka qabashada garoomada dayaradaha Lascanod iyo Baran.
3. Dawladu waxay ku dadaalaysaa dayactirida wadooyinka laamiga ah ee gobolada iyo degmooyinka isku xira iyo kuwa aada meelaha aan laamiga ahayn, waxay xoog saareysa dayactirka jidkii shiinuhu dhisay.
4. Dawladdu waxey xoojineysaa hayadaha u xilsaaran wax ka qabashada kaabayaasha dhaqaalaha iyo bulshada.
5. Dawladdu waxay dib udhis ku samaynaysaa iyo dayactir dhismayaasha weli burbursan ee dawladda.
6. Waxaa kale oo Dawladuu xoojinaysaa isticmaalka sharciga iyo calaamdaha jidadka iyo qaadashada laysamada wadida baabuurta, si loo yareeyo shilalka baabuurta oo hadda batay.
7. Dawladdu waxay u hawlgeleysa dhisme idaacad daladeed oo war laliskeedu gaarikaro dhamaan Somalia, waxayna soo celineysaa fafinta wargeyska codka dawladda.
8. Dawladu waxay dhiiri galinaysaa horumarinta Tamarta, iyadoo laga faa'iidaysanayo dabaysha iyo qoraxda si loo helo tamarta jaban.
9. Dawladu waxay dadweynaha ku wacyi galinaysaa isticmaalka birkijooyinka casriga ah ee tashiila dhuxusha iyo xaabada.

10. Dawladdu waxay taageerta shirkadaha iyo heyadaha Korontada si dab loogu helo magalooyinka waaweyn.
11. Waxaa kale oo dawladdu ku dadaleysa sidi loo ballarin laha mahsaricda biya gelinta ee ay hadda deqbixiyayashu ina ka kalmmeyaan.

## 11. Arrimaha bulshada.

Adegyada bulshada ee xukumada laga doonayo inay fuliso mudada barnaamijka waa wax ku xiran awooda dhaqaale iyo jiritanka kabayasha bulsho ee dalka Puntland ka jira. Burburkii ka hor dalka Puntland kama jirin wax adeegyo bulsho oo la taban karo ee dawladii hotre ay ka hirgelisan demadan. Hase yeshee intii Puntland mamulku ka jiray mid gobollo iyo mid dawladeedba ha ahaatee waxa ka qabsoomay hirgelin adegyo bulsho ee la tabankaro. Arrimahaas xoggoda waxaa ka qayb qaatay heyadaha calamiga ahsiiba xagga cafimaadka iyo biyaha iyo dadweynaha rer Puntland oo hurumar weyn ka geysatay dhinacyada bulshada, iyadoo ay markasta koobneyda awooddа dawladda ay ku hanan karto fidinta adeegyada bulshada ee dadkeedu u bahan yahay.

Waxay xukuumaddu guud ahaan ku dadaalaysaa inay kordhiso dorkeeda ka qayb gal ee arrimaha adeegyaasha bulsho kuwaasoo ka kooban waxbarashada, caafimaadka, horumarinta tabarada shaqaalaha, sportiga, kabidda biyagelinta iyo nal galinta magalooyinka, kor u qadidda hidaha iyo dhaqanka iyo ilaalinta anshaxa dhaqan iyo diineed ee dadweyna.

### 11.1. Waxbarashada

In kastoo waxbarashadau gooni u ahayd sanadihii la soo dhaafay lahaanshaha gaar ahaaneed hadana waxay samaysay koboc iyadoo xoogga u wayni ahaa kaalmada bulshada iyo hayadaha sama falka.
Waxay dawlada Puntland goosatay inay u samayso wasaarad gaar ah si loo hormariyo waxbarashada waxaana u qorshaysan sidan:

- Ku barbaarinta iyo baridda carruurta caqiidada Islaamka
- Samaynta barmaamujyo lagu hormarinayo inta ay ka gaarayaan 3 ilaa 6 sano
- Xoojinta waxbarashda aasaasiga ah, sida hagaajinta dugsiyada iyo dhisidda kuwa cusub iyo dhiiri gelinta macalimiinta.
- Taageerida dhismaha jaamacadaha iyo macaahida la siman ee derejada saddexad ee waxbarasho, iyo aqoonsigooda calami ee shahadooyinkooda.
- Baahinta waxbarashada dadban si ay uga faaiidaystaan dhalinyarada ay geftay waxbarashada aasaasiga ah.
- Ladagaalanka akhris iyo qoris la'aanta
- Midaynta manhajka waxbarashda ee dugsiyada gaarka ah iyo kuwa dawlada.
- Raadinta deeqaha waxbarashada
- Diyaarinta shahaadooyinka heerarka kala duwan ee waxbarashada.

### 11.2. Caafimaadka

Xaalada caafimaad ee dalku waa hooseysa, siiba cafimaadka guud (Public health) waxayna u baahantahay wax ka qabad ballaaran oo qaadanaya waqti dheer, sidaas darteed waxaa u qorshaysan dawladda:

- Dibuhabaynta iyo toosinta maamulka caafimaadka ee heer

- Xog ururinta tira koobyada caafimaadka
- Kor uqaadida aqoonta shaqaalaha caafimaadka
- Shaqaalaynta shaqaalaha caafimaadka Isbitaalada gobolada
- Habaynta tababarada dugsiyada kalkaaliyayaasha
- Ka hortaga cudurada faafa sida HIV (AIDS) iyo daacunka, iyo daweynta cudarada kale oo faafa.
- Daryeelka dhalaanka iyo hooyooyinka
- Xoojinta daryeelka caafimaadka asaasiga ah
- Balaarinta barnaamijyada talaalka caruurta
- Wacyi gelinta bulshada dhinaca caafimaadka
- Joojinta gudninka fircooniga ah.

11.3. Dhalinyarada iyo Ciyaaraha

Dhalinyaradu waa jiilka mustaqbalka laga filayo inay horumariyaan siyaasada iyo dhaqaalaha bulshada bedelaana jiilka hada jira, sidaas darteed dawladu waxay xooga saareysaa xoojinata wax barashada xirfadeed iyo tababaradooda, waxeyna samaynaysaa Naadiyo dhalinyaro Sport si loogu sameeyo gobo ay waqtigooda firaaqda ah ay mushquulahay arrimaha jirdhiskooda iyo cafimaadkoda ka qayb qadanay. Tasoo ka doweysa ku mushquliidda balwada Qaadka iyo cadooyinka kale ee xun xun.

Ciyaaruhu waxey qofka ka dhisaan dhinacyo badan waxaanaka mid ah:

- Dhismaha jirka
- Maskaxda

Ciyaauhu waxay ka fogeeyaan dhalin yarada Mukhaadaraadka, anshaxa iyo akhlaaq xumada, caajiska iyo shaqo nacaybka siddas darteed Dawladdu waxay dhiiri gelinaysaa shaqaale utababaran xirfadaha ciyaaraha, dayac tirka garoomadii hore ujirey iyo abuurista kuwo cusub, qabashada tartanka ciyaaraha ee gobolada, xoojinta tababarada garsoorayaasha, in la xoojiyo xiriirka ka dhaxeeya ciyaaraha Puntland, Somalia inteeda kale iyo aduunka.

11.4. Shaqada iyo shaqaalaha

Shaqaaluhu waa lafdhabarta wax soosaarka iyo horumarka bulsho ee dalka, hurumarkuna wuxuu ku xiranyahay tayada shaqaalaha. Shaqaaluhu waa muruqa iyo maskaxda ummadeed ee lagu meel mari karo, sidaa awgeed waxay xukuumada Puntland lagama maarmaan u aragtaa in shaqada iyo shaqaalaha ay ahmiyad weyn mudanyihiin, waxana Dowladda u qorsheysan:

- Kor uqaadista tayada waxqabad ee shaqaalaha
- Ku wacyi gelinta dhawrista hantida ay gacanta ku hayaan
- Abuurista xarun lagu tababaro shaqaalaha
- U raadinta deeqo waxbarasho ee dibedda iyo gudahaba ah.
- Dib u habaeyn guud oo lagu sameeyo shaqaalaha Puntland

11.5. Hawenka

Xaalada haweenka Puntland waxaa si gaar ah saamayn weyn ugu leh duruufaha qalafsan ee nololeed iyagoo tan iyo burburkii dawladii dhexe iyo ka horba culays gaar ahi ka fuulay daryeelka qoyska taas oo ay habeen iyo maalin ku hawlan yihiin macayshad u raadinta ilmahooda iyo xannanayntooda. Bulshada haweenka oo lagu qiyaaso in ay ragaa ka badanyihin, waxaa haysta dhibaatooyin ay ka mid yihiin wax-barahso la'aan, qoris iyo akhris la'aan, taaso yareyneysa wax soo saarkii ay bulshada ku birin lahaayeen. Haweenku waa dadka ugu badan ee meheradaha yar yar ka shaqeeya, sidaa darteed xukuumadu waxay dhiiri galinytasaa ka qayb qaadashada haweenka ee arrimaha kala duwan ee bulshada, waxayna xoojinaysaa ka qayb galida gabdhaha waxbarashada. Sido kale dumarka waaweyn waxay ku dhiri gelineysa waxbarashada dadka waaweyn, xukuumadu waxay kale ku dhiiri galinaysaa in haweenku ka qayb qaataan hawlaha siyaasada iyo mamulka.

11.6. Daryeelka danyarta

1. Waxay xukuumadu intii karankeeda ah wax ka qabata daryelidda danyarta, sida agoomaha, hawl gabka, and naafada, waxayna ku dadaaleysa inay sii kordhiso.

11.7. Hidaha iyo Dhaqanka

Hidaha iyo dhaqanku waa astaan-sumadeedka iyo baadi-sooca bulshooyinka aduunka kuwaasoo ku camal falkoodu qeexo heerka qofku dhaqan bulshadeedka uu ka tirsan yahay, sidaa awgeed dhaqanka iyo hiduhu waa silsilada isku xirta iskuna haysa mujtamaca isla markaasna keenta is-ahaanta, isku hilowga, ehil isu noqoshada iyo istolaysiga bulshadeed, abuurtana ku kalsoonida macnawiga ah iyo u hanwenaanta hido asaleedka qofka sidaa daraadeed waxaa xil waajibeedyada Puntland ka mid ah in ay badbaadiso, horayna u mariso astaamaha taariikheed hidaha iyo dhaqanka Somali-yed ee soo jireenka ah, waxyaaba ugu horeeya ee xukuumadu wax ka qabaneyso waxaa ka mid ah:

- Iney u hawl gasho sidey u ururin lahayd una horumarin lahyd suugaantii Somalida
- Inay raadiso isuna keento wixii ka harey hal abuurayashi (abwanadii) Somaliyed
- Sidoo kale inay raadiso ururisona wixii ahaa Hidaha iyo Dhaqanka oo ahaa qoraalo iyo farshaxan.
- Iney abuurto guddi hidaha iyo dhaqanka, fanka iyo sugaanta.

DAWLAD G. PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE
OF SOMALIA

XAFIISKA MADAXWEYNAHA

OFFICE OF THE PRESIDENT

**XEER MADAXWEYNE LAM. 110.** **Mbegati Kenya, August 21,2003**

## MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND

**MARKUU ARKAY:** Dastuurka Dawladda
**MARKUU ARKAY :** Talo soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda
**MARKUU TIXGELIYEY :** Go'aanka Golaha Wasiiradda Dawladda.
**MARKUU GARWAAQSADAY:** Ciriiriga Dhaqaale iyo duruufaha adag ee lagu jiro

### WUXUU XEERIYEY

1. Isbedelka Miisaaniyadda sanadka 2003, taasoo dhan Sh.So 21,000,000,000 (Kow iyo labaatan Bilyan Sh.So Bishiiba ) Dakhliga iyo kharash, halkay ka ahayd 17.785,098,000 ah Bishiiba.

2. In marka laga bilaabo 1, July 2003, laga jaro ku meelgaar ahaan kharashyadda Miisaniyadu ka kooban tahay oo ah mushar, Guno, Adeegyadda, Khidmadaha iyo kharashyadda kale ee Guud 10% Inta mushaharkoodu 800,000 gaaro.

3. Sidoo kale laga bilaabo Bisha Todobaad ee July 2003, in laga jaro 10% Dakhliyadda Hay'adaha Dawladda ee Bangiga iyo Wasaaradda Maaliyadu u qabtaan lacagaha Dakhliga ah, sida PSAWEN, Rugta Ganacsiga, D/Hoose, Bangiga iyo NESHA.

4. In laga gooyo faraqa u dhexeeya qiimaha doolarka ee lagu qaado canshuuraha (Sh.,So 18,500), iyo midka lagu bixiyo Mushaharooyinka Golayaasha (Sh,So 20,000), wixii 200 $ oo doolar uu gaaro iyo ka badan .

5. Waxaa lagama maarmaan ah in la tiro koobo tiradda Ciidamadda iyo Shaqaalaha Dawladda tiradooda dhabta ah, inta ka horaysa kalfadhiga Baarlamaanka October 2003.

6. Waxaa la hakiyey inta sanadka ka harsan qorista iyo dalacaadda Ciidamada iyo Shaqaalaha Dawladda Puntland oo dhan.

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda G. Puntland

DAWLAD G. PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

Golaha Wakiilada

PUNTLAND STATE
OF SOMALIA

Representative council

## Xafiiska Gudoomiyaha

*Ref:XGGW/DGPL/160/03* **Date: 2/09/03**

Ku: sii hayaha Madaxweynaha ahna
Ahna Madaxwyne ku xigeenka DGPL **Garoowe**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ee DGPL**

MARKUU ARKAY:- dastuurka DGPL
MARKUU ARKAY :- xeer madaxweyne
MARKUU ARKAY:- go'aanka golaha xukuumada
MARKUU ARKAY:- isdhinka miisaaniyada 2003
MARKUU TIXGALIYEY:- duruufaha dhaqaale ee shaqaalaha iyo ciidamada
MARKUU GARWAAQSADEY:- go'aanka Golaha wakiilada ee 2/9/03

**wuxuu Gudoomiyey**

1. in lacagta laga jarayo gunnooyinka shaqaalaha, ciidamada iyo dhamaan masuuliyiinta Dawlada ee lagu dheelitirayo isdhinka miisaaniyadda 2003 dib loogu magdhabo marka miisaaniyadu cag dhigato dheeraadna la helo (balanced budget with surplus) kalfadhiga October 2003, la soo hor dhigo golaha .
2. in dhamaan Golayaasha Dawlada iska xilsaaraan sugida tirada iyo tayada shaqaalaha iyo dhamaan ciidamada Puntland kalfadhiga October 2003 ka hor
3. in doolarka sarifkiisa mushahaar, gunno iyo canshuurba ahaado 20,000 SH.So ( halkii oo doolar )

**wabilaahi Tawfiiq**

**Yuusuf Xaaji siciid**
**Gudoomiyaha Golaha wakiilada DGPL**